



**mamamundo**

[www.mamamundo.ch](http://www.mamamundo.ch)

# Fasalada dhalashada carruurta ee luqaddaada ku baxaya

Deutsch • Shqip • தமிழ் • English • བོད་སྐད་ཡིག • Soomaali • اللغة العربية  
Español • Kurdî • Français • ትግርኛ • فارسی  
ትግርኛ • ቋንቋዎቹ • Português

**SOMALISCH • BERN**

HADDII AAD KU HADASHO LUQAD KALE, FADLAN NALA SOO XIDHIIDH OO  
WAXAANU ISKU DEYI INAANU KUU ABAABULNO TURJUMAAN



# Xiisadaha dhalmada carruurta ee haweenka /lamaanaha ee adduunka oo dhan

**Kooraska waxaa loogu tala galay haweenka hooyooyin ku noqon doona meel ka fog wadankooda hooyo.**

Umulisada iyo turjubaaku waxay ka jawaabi doonaa su'aalahaaga oo waxay kugu wargelin doonaa wax ku saabsan uurka, dhalmada, naas nuujinta iyo wakhtiga ilmahaaga xaga guriga.

Waxa ay ku tusi doonan sida aad isugu dejinayso ama nafisayso jimicsiyada jidhka oo ugu diyaar garoobayso dhalmada. Waxaad kala hadli kartaa haweenka kale waayo aragnimadaada iyo filashooyinka ku saabsan wakhtigan gaarka ah. Sidoo kale waxaad barbar dhigi kartaa caadooyinka dhaqanka haweenka kale.

Koorasadan waxay u dhacaysaa todoba qaybood. Waxaa lagu talinayaa inaad booqato kooraska inta uu uurkagu u dhaxeeyo 5 ilaa 9 bilood.



## Wakhtiyada kooraska

Koorasku waxa uu dhacaa galabnimada ama fiidka hore. Waxaad ka heli kartaa macluumaadka kooraska ee hada iyo wakhtiyada kooraska barta internatka [www.mamamundo.ch](http://www.mamamundo.ch)

---



## Kharashka

**Kharashka koorasku waxa uu ku xidhanyahay dakhligaaga \***

Qoys aan dakhli lahayn

Qoys leh hal dakhli

Qoys leh labba dakhli

Mamamundo waxay heshaa 150 dheeraad ah - oo ka yimid caymiskaaga caafimaad.

**\* WAXAA JIRTA MAALIYAD LOO HELI KARO QOYSASKA AAN LAHAYN ILO DHAQAALE.**